



Waxbarasho khasabka ah

Ku: waalidiinta ku dhaqan Gellerup
iyo Toveshøj.

Xasuuso, in aad u dalabto ilmahagaaga xanaano ama
hooyo xanaano ugu dambeyn saddex bilood ka hor
intuusa jirsan 1 sano.

Hadii kale sharcigu wuxuu dhigayaa in xanaano qasab
uu bilaabo.

Wixii faahfaahin dheeraad ah ka sii aqri aarhus.dk/obl
ama warqadahan dhabarkooda.

XUSUUSOW

Warqad ayaa laguugu soo
diri doonaa e-boks.ka

1

Ka soo qor ilmahaaga xanaano ama dumarka ilmaha guryaha ku haya

Waa in aad u dalabatid xanaano ilmaha, ugu dambayn 3 bilood ka hor intuuusan buuxin 1 sano. Waxaana ka dalbanaysaa barta internetka ee xanaanooyinka aarhus.dk/skrivop

Waa muhiim, in aad ku qortid dalabka in ay ilmuhu bilaabaya xanaanada, bisha uu sanad jirsandoono

Qarashka xanaanada

Waxaad haysataa fursad aad ku codsan kartid in xanaanada lagaa wada bixiyo ama qayb lagaa kabo, qarasha ilmahaaga lagu hayo.

Jawi degan ku bilaaba xanaanooyinka

Ilmahaagu markuu bilaabo xanaanooyinka, shaqaaluhu wuxay ku daalayaan in ilmahaaga iyo adiguba aad dareentaan soo dhaween iyo jawi degan. Xanaanada ilmuhu maalin walba waxay fursad u helayaan cayaaro kali kali ah mid koox koox ah. Ilmahaagu asxaab ayuu yeelanayaa, af-deenishka na wuu ku baranayaa bulshadana wuu dhex galayaa. Ilmaha xaanaanooyinka soo maraa iskoolku wuu u sahlanaadaa inta badan.

3

Nagala soo xiriir

Hadii aad susaal qabto, waxaa kala xiriri kartaa. Xafiika xanaanooyinka iyo kan maareynta guud.

Telefoonka 89 40 22 22

Isniin, talaado iyo khamiis saacada.9.00-11.00

Waxaad sidoo kale ka waraysan kartaa warbixinta xanaanada kalkaalisada caafimaadkaaga iyo daryeelka booqashadeeda ilmuhu markay jiraan 9 bilood.

Ka sii aqriso wixii faahfaan ah aarhus.dk/obl

2

Waxbarshada qasabka ah

Hadii aan ilmahaaga loo dalbin xanaano mudadii loo qabtay, waxaa lagu qasbayaa in ay bilaabaan waxbarsha qasabka ah

Waxbarasha qasabka ah waxay ilmuhu ka qaybqaadanayaan xanaanada jawigeeda iyo madadaaloyinkeeda.

Waxaa kaloo sharuudaha waxbarshada qasabka ka mid ah:

- In ilmahaagu ay digtaan 25 saacadood toddobaadkii
- Ilmahaagu waa inuu ka qayb qaataa koorso halkaas oo uu ka barto dhaqanka deenishka, ciidaha iyo qiyamka. Koorasku wuxuu sidoo kale diiradda saari doonaa barshada luqadda ilmahaaga, iyo korinta caqliga.
- Labada waalidba waa inay kaqaybqaataan barnaamijka taclinta khasabka ah iyada oo lala kaashanayo xanaanada.
- Waxbarashada qasabka ah waa bilaash, laakiin waa inaad bixisaa cuntada oo aad soo qaadatid xafaayadda.
- Sida ku xussan xeerka xanaanooyinka qod-dobka §44f farqda 3. waxaad xaq u leedahay in aad guriga ku haysato ilmahaaga. Guriga ku haynta waxaa laga doonayaa buuxinta shuraadaha xanaanooyinka deg mada oo kale. Kormeero lagu hubinayo tayada ayaa laguugu imaandoonaa.

Waa ku waajib in ay yimaadaan ilmaha iyo waalidkaba

Waxaan ku gu bararujinayanaa in waalidka iyo ilmahada ay qasab ku tahay imaanshuhu.

Taas macnaheedu waa hadii ilmaha la keeni waayo ama waalidiintu ay ka qaybqaadan waayaan kulamada/shirarka waxaa laga joojin karaa lacagta ilmaha.

